**Dhisidda Awoodda Cultural STAR (horay loogu yaqaanay Horumarinta Ururka) Tilmaamaha**

## Macluumaad Muhiim ah

| | |
|---|---|
| **Wakhtiga kama dambaysta ah ee Codsiga** | Jimce, Maarso 13, 2026<br>4:00 galabnimo. |
| **Wareysiyada Codsadeyaasha** | Abriil/Maajo 2026 |
| **Wakhtiga ugu horeeya ee Mashruucu Bilaabanayo** | Ogoosto 1, 2026 |
| **Wakhtiga Ugu dambeeya ee Mashruucu Dhamaanayo** | Luuliyo 31, 2027 |

### Isbadalada muhiimka ah ee mudan in la xuso:

**Waxaa jiri doona kaliya hal codsi sannadka oo dhan iyo sannadada soo socda.**

- Mashaariicda xaqa u leh codsigaan waa in la fuliyaa inta u dhexaysa Ogoosto 1, 2026, iyo Luuliyo 31, 2027. Abaalmarinada waxaa dhici karta inaan la ansixin ilaa laga gaarayo billoowga ilaa dabayaaqada xagaaga, sidaas darteed waxaa jirta suurtagalnimo xoogan oo ku saabsan in qaar kamid ah codsiyadu aysan ogaan go'aanka ku saabsan codsigooda deeqda ilaa inta mashruucuudu ka dhacayo.

**Codsiga Deeqda Ugu yar**: $5,000 (si lamid ah sannadkii hore).

**Isbadalka shuruudda waafajinta maalgalinta:** Waafajinta maalgalinta ha-ka-halka ah waxaa kaliya oo ay shuruud u tahay codsiyada deeqaha ka badan $50,000

Fadlan daalaco tilmaamahaan si taxadar leh si aad go'aan uga gaarto in kooxdaada iyo mashruucaagu u qalmaan maalgalinta Cultural STAR Program, aadna u baratao qaabka loo codsado.

**Kala xiriir shaqaalaheena wixii su'aalo iyo caawimaad ah.**

Iskuduwaha Barnaamijka: Jessica Larson Johnston
jessica.larson.johnston@ci.stpaul.mn.us, 651-266-8654

Kaaliyaha Maareeyaha Barnaamijka:

Iimaylka Guud ee Cultural STAR: ped-culturalstar@stpaul.gov

## Tafaasiisha Barnaamijka

### Ujeedada, Hadafyada Maalgalinta, iyo Istiraatiijiyadaha

Ujeedada maalgelinta **Cultural STAR** waa in sare loo qaado awooda dhaqanka iyo kobaca dhaqaalaha, khaastaan bartamaha Cultural District (Degamada Dhaqamada), ayadoo la xoojinayo bulshada farshaxanka iyo dhaqanka.

Lacagta Cultural STAR, waxaa loogu talagalay in:

- Lagu dhiso la iskuguna keeno dadka loo danleeyahay;
- Sare loo qaado qaybaha kala duwan ee dhaqanka;
- La sameeyo saameyn muddo dheer ah; iyo
- Laga faa'iidaysto taageerada maaliyadeed ee dheeraadka ah.

Barnaamijka Cultural STAR wuxuu ujeedadaas ku gaari doonaa asagoo deeqo siinaya mashaariicda iyo barnaamijyada:

- Soojeedanaya dadka loo danleeyahay;
- Diyaarinaya sidoo kalena hagaajinaya goobaha dhaqamada; iyo
- Dhisaya awoodda farshaxamaysteyaasha iyo ururada dhaqanka.

### Aagga Diiradda la saarayo

Ugu yaraan 80% maalgalinta Cultural STAR waxaa la siin doonaa ururada khayriga ah ee ku yaala aagga bartilmaameedka ah ee loo yaqaano Cultural District ee bartamaha Saint Paul.

20% ka soo hartay ee maalgalinta waxaa loo qorsheynayaa:

- Ganacsiyada faa'iido doonka ah ee laga helo Cultural Distric si loogu maalgaliyo mashaariicda kor u qaadaya farxadda booqadeyaasha Cultural District; ama
- Ururada khayriga ah ee ku yaala Saint Paul laakiin ka baxsan Cultural District.

**Cultural District** waxaa lagu qeexaa aagga dhinaca waqooyi xaduudka kala leh Interstate 94, bariga Lafayette Bridge, koonfurta Harriet iyo Raspberry Islands, galbeedkana Chestnut Road.

Ku yaala **Cultural District** waxaa kamid ah:

- Urur ka diiwaangashan Waaxda Gobolka Minnesota oo leh goob deegaan oo ku taala Cultural District; ama
- Urur dhisme ku leh Cultural District kaasoo leh ujeedo si toos ah ula xiriirta mashruuca Cultural STAR; ama
- Urur haysta kiro ama heshiis kiraysi dhul ku yaala Cultural District kaasoo ujeedadiisu si toos ah ula xiriirto mashruuca Cultural STAR; ama
- Urur haysta oggolaansho ama qandaraas uu ku isticmaali karo Goobaha Dadweynaha ee ku yaala Cultural District ujeedo si toos ah ula xiriirta Mashruuca Cultural STAR.

Ku yaala **Saint Paul** waxaa kamid ah:

- Urur ka diiwaangashan Waaxda Gobolka Minnesota oo leh goob deegaan oo ku taala Saint Paul; ama
- Urur dhisme ku leh Saint Paul kaasoo leh ujeedo si toos ah ula xiriirta mashruuca Cultural STAR; ama
- Urur haysta kiro ama heshiis kiraysi dhul ku yaala Saint Paul kaasoo ujeedadiisu si toos ah ula xiriirto mashruuca Cultural STAR; ama
- Urur haysta oggolaansho ama qandaraas uu ku isticmaali karo Goobaha Dadweynaha ee ku yaala Saint Paul ujeedo si toos ah ula xiriirta Mashruuca Cultural STAR.

**Tafaasiisha Barnaamijka Wadood Dhiska**

Barnaamijka awood dhiska ah wuxuu bixiyaa deeqo loogu talagalay mashaariicda loogu talagalay xoojinta maaraynta, maamulka, ama shaqooyinka ururka ka faa'iidaysanaya. Hawlaha noocaas ah waa inay 1) sare u qaadanayaan ujeedada kooxdaada, iyo 2) ay leeyihiin awood ay ku samayn karaan saamayn muddo dheer ah. Ujeedada barnaamijku waa inuu xujeeyo ururka, ku khasbo inuu la yimaado fikrado, sameeyo nidaamyo cusub, ama xoojiyo nidaamyo horey u jiray si loo sii wado kobaca iyo horumarka ururka.

**Qiyaasta Maagalinta Diyaarka u ah 2026**

| | |
|---|---|
| **Gudaha Cultural District** | $ |
| **Ka baxsan Cultural District, sidoo kalena ah ganacsi faa'iido doon ah oo mashaariic ka fuliya Cultural District** | $ |

## U qalmitaanka

Codsadeyaasha u qalma waxay codsan karaan hal mid kaliya noocyada maalgalinta Cultural District ee soo socota inta lagu jiro waji kasta oo maalgalin ahba: Deeqda Mashruuca Gaarka ah; Deeqda Dhisidda Awoodda (waxaa oray loogu yaqaanay Deeqda Horumarinta Ururka); Deeqaha Capital Project Grant waxaa la heli karaa hal mar sannadkii.

Ururada farshaxanka iyo dhaqanka ee aan faa'iido doonka ahayn ee ku yaala Saint Paul kuwaasoo ka baxsan Cultural District waxay codsan karaan laba jeer sannadkii waxayna heli karaan maalgalin gaaraysa ilaa laba jeer sannadkiiba –markii mashaariicdu ka dhacayaan meel ka baxsan Cultural District iyo marka mashariicdu ka dhacayaan gudaha Cultural District.

**Kooxaha codsanaya waa inay noqdaan mid kamid ah kuwa soo socda:**

- Ururada khayriga ah iyo kuwa dhaqanka ee ku yaala gudaha magaalada Saint Paul
- Kooxaha farshaxanka ka shaqeeya ee aan rasmiga ahayn oo/ama aan

diiwaangashanayn, shakhsiyaadka, iyo mashaariicda farshaxanka ee halka mar ah ee la xiriira farshaxanka aan faa'iido doonka ahayn iyo ururada dhaqanka ee ku yaala gudaha Magaalada Saint Paul waxayna noqon karaan maalgaliyaha maaliyadda iyo qandaraaska, haddii la helo: (1) 100% mashruuca oo ka dhacaya gudaha **Cultural District**; iyo (2) farshaxankaas aan faa'iido doonka ahayn iyo ururkaas dhaqanka oo galaya qandaraaska Magaalada Saint Paul

- Farshaxanka aan faa'iido doonka ahayn iyo ururada dhaqanka ee ka baxsan Saint Paul ee mashaariicda ka wada Cultural District Saint Paul
- Ganacsiyada faa'iido doonka ah ee ku yaala **Cultural District** waxay codsan karaan mashaariicda horumarinaysa farxadda magaalada
- Waaxyaha magaalada ama qaybaha ayaa u qalma markay la kaashanayaan, ama uu taageero, urur u qalma

**Kuwa soo socda uma qalmaan inay codsadaan:**

- Kaniisadaha iyo ururada diimaha
- Xisbiyada siyaasadda iyo kooxaha siyaasadda ka shaqeeya
- Hay'adaha iyo waaxyaha heer federaal, gobol iyo ismaamul
- Ururada (aan ka ahayn kuwa la xiriira kooxaha diirada saara farshaxanka ee aan rasmiga ahayn iyo/ama aan diiwaangashanayn, shakhsiyaadka, iyo mashaariicda farshaxanka ee halka mar ah, si ay u noqdaan maalgaliyaha maaliyada iyo qandaraaska sida ku cad Tilmaamahaan) oo ah inay heleen Horumarinta Ururka iyo/ama deeqaha Mashaariicda Gaarka ah saddex jeer oo iksu xigta (sanno)
- Ganacsiyada faa'iido doonka ah ee ku yaala meel ka baxsan Cultural District
- Haddii horey laguugu abaalmariyay aadna kujirin qandaraaska abaalmarinta STAR oo hadda shaqaynaysa, uma qalantid inaad codsato abaalmarin kale oo STAR ah.

## Maalgalinta Mashruuca – Kharashaadka U qalma iyo Shuruudaha Waafajinta

### Shuruudaha Codsiga Maalgalinta

- Codsiga deeqda ee ugu yar waa $5,000. Suurtagal maahan in Guddigu ku taliyo in la maalgaliyo codsi kasta oo ka badan $50,000.
- Codsiyada deeqaha ee ka sareeya $50,000 waa in la waafajiyaa halkii doolar ba hal doolar dhamaanba cadadka deeqda. Tusaale ahaan, haddii codsiga deeqdu yahay $50,500, kharashka guud ee mashruuca ee ku cad qaybta miisaaniyadda codsiga waxaa looga baahanayaa inay muujiso wadar gaaraysa ugu yaraan $101,000, oo leh qaaraan maalaglin oo waafajin hal-ka-hal ah oo ka imaanaysa ilo kale oo maalgalineed.
- Codsi kan lamid ah ama islamid ah looma soo gudbisan karo wax ka badan hal mid oo kamid ah barnaamijyada soo socda halkii waji oo maalgalin ahba (sannadkii): barnaamijka Capital Improvement Budgeting (CIB, Miisaaniyadda Horumarinta Magaalada), barnaamijka Neighborhood STAR, iyo barnaamijka Cultural STAR.

- Ururada helaaya deequhu waa inay u hogaansamaan shuruucda, xeerarka, federaalka, gobolka, iyo deegaanka, iyo nidaamiyeyaasha la xiriira mashruuca, oo ay kamid yihiin laakiin aan ku ekayn, Saint Paul Vendor Outreach Program (VOP). **Waa muhiim in la fahmo in shuruudaha u hogaansamiddu saamayn ku yeelan karaan habraacyada shaqaalaysiinta iyo sicirka mushaaraadka, si aan balanqaad loo sameyn kahor intaan si buuxda loo fahmin shuruudahaan.**

**Waa maxay maalgalinta baraamijku / qaabka aad u isticmaali karto maalgalinta deeqda:**

- Kharash walba oo ku baxaya mashruuca oo si gaar ah u khuseeya fulinta mashruuca:
  - Shaqaalaha
    - La taliyeyaasha
    - Shaqaalaha
    - Qandaraasleyaasha
  - Adeegyada
  - Daabacaada iyo boostada
  - Kiraysiga goobta iyo qalabka *kuma jirto kirada joogtada, bil-laha ah
  - Gaadiidka iyo safarka
  - Kharashaadka kale ee muhiimka u ah fulinta mashruuca

**Waxyaabaha uusan barnaamijkaanu maalgalinayn:**

- Shaqooyinka laga qabanayo meel ka baxsan Saint Paul
- Shaqooyinka loo qabtay sida lamidka ah iyo ujeedada lamidka ah ee socota
- Hawlaha la dhamaystiray kahor taariikhda bilaabashada mashruuca u qalma oo ah Ogoosto 1, 2026, ama kaddib dhamaadka mashruuca u qalma oo ah Luuliyo 31, 2027
- Horumarinta magaalada ama dhismaha, iibisiga qalabka dhismaha ee dhabta ah ama iibsiga guri run ah ama hanti
- Hawlaha ku lug yeesha olaole siyaasadeed, u adeega bulsho diimeedka ka qaybqaateyaasha, ama takooraya shakhsiyaadka ama dadka
- Cuntada ama sharaabka
- Kharashaadka la xiriira daboolista caymiska
- Bandhigyada qaaraan ururinta ah

**Qaybinta Maalgalinta / Shuruudaha Waafajinta**

- Markii la meelmariyo heshiiska deeqda ee qeexaya miisaaniyadda mashruuca ee kama danbaysta ah iyo baaxada shaqada, 80% maalgalinta deeqda ayaa la bixin doonaa.
- Lacag bixinta ugu danbaysa ee baaqiga 20% ee haray waxaa la bixin doonaa kaliya markii la dhamaystiro sidoo kalena warbixinta kama danbaysta ah ee

mashruuca taasoo ay la socdaan dukumiintiyada soo socda lasoo gudbiyo lana ansixiyo:

  - Warbixinta faahfaahinta ah ee ugu danbaysa
  - Dukumiintiyada kharashaadka lagu dalacayo deeqda Cultural STAR
  - Dukumiintiyada maalgalinta iswaafajinta
  - Dukumiintiyada mashruuca socday, oo ay kujiraan cadaynta aqoonsiga saxda ah ee la siiyay caawimaadda barnaamijka Cultural Support.
  - Deeq qaateyaasha waxaa laga filayaa inay soo gudbiyaan codsiga qaybinta ee kama danbaysta ah ayna kusoo xiraan deeqdooda 90 maalmood gudahood laga bilaabo dhamaadka mudada qandaraaska.
- Haddii mashruuca la dhamaystiro kahor intaan la fulin qandaraaska, markaas asagoo Deeq bixiyuhu isticmaalaya go'aankiisa u gaarka ah, Deeq bixiyuhu wuxuu dooran karaa inuu bixiyo 100% maalgalinta STAR hal mar; haddii la helo in, Deeq bixiyaha ay waajib ku noqonayso inuu soo gudbiyo una hogaansamo dhamaanba shuruudaha labadaba qaybintii hore ee 80% ahayd iyo qaybinta kama danbaysta ah ee 20% ah.
- Warbixinta kama danbaysta ah, deeq qaataha qaadanaya in ka badan $50,000 oo ah deeqda Cultural STAR ee loogu talagalay Horumarinta Ururka waa inay muujisaa in cadadka deeqda ee Cultural STAR ee buuxa la waafajiyay doolar ka doolar.
  - Ugu yaraan 70% iswaafajinta Mashaariicda Gaarka ah iyo Horumarinta Ururka waa inay ahaadaan doolar.
  - Ilaa 30% iswaafajinta waxay noqon karaan badeeco ama adeegyo, sida shaqaalaha, adeegyada xirfadaha, goobaha xaafiiska, adeegyada, shaqaalaha mutadawiciinta ah iyo iskaa wax u qabsada.
    - Shaqaalaha mutadwacnimada ah iyo iskaa wax u qabsada waxaa lagu qiimaynayaa $15.00 saacadii.
  - Maalgalinta gaarka loo leeyahay, ismaamulka, gobolka iyo federaalka waa in loo isticmaalo iswaafajinta.
  - Guddiga Cultural STAR waxay awood u leeyihiin inay usoo jeediyaan oggolaanshaha qaaraanada kale ee iswaafajinta ayagoo ku salaynaya xaalad walba gaarkeeda. Guddiga Cultural STAR Board wuxuu xeerin karaa filashooyinka shuruudaha iswaafajinta xaaladaha inta badan a an caadiga ahayn.

## Habraacyada Qiimaynta

Codsiyada barnaamikaan loo soo gudbiyo waxaa lagu qiimeyn doonaa afartaan habraac ee soo socda, mid kastana wuxuu u dhigmaa 5 dhibcood, ayadoo dhibcaha guud ee ka imaan karaa noqonayaan 20 dhibcood:

**Saamaynta (5 dhibcood) – Codsiyada wanaagsan waxay gudbin doonaan sida mashruucu faa'iido ugu leeyahay Saint Paul – asagoo kordhinaya adeegsiga**

**qaababka farshaxanka iyo dhaqamada ee kala duwan, wax ka qabanaya baahiyaha dhaqanka, sidoo kalena gaaraya dadka loo danleeyahay.**

*Ugu wanaagsan (5 dhibcood), Wanaagsan (4 dhibcood), Ku filan (3 dhibcood), Wax la iska weydiin karo (2 dhibcood), U baahan horumarin (1 dhibic)*

- Waa maxay dhibaatada, fursadda, ciladda, ama baahida mashruucani xalinayo? Sidee loo go'aaminayaa?
- Maxaa kugu riixaya xaaladdaan? Sidee wax ka qabashada fursadaan/baahidaan ugu leedahay muhiimad, saameyn muddo dheer ah ururkaaga?
- Sidee mashruucani u hagaajinayaa awooda balaarinta ama xoojinta adeegyadaada dhaqanka?
- Sidee lacagta STAR looga faa'idaysan karaa inay noqoto taageero dhaqaale oo dheeraad ah oo laga helo Saint Paul?

**Tayada (5 dhibcood) – Codsiyada aadka u wanaagsan waxay qeexayaan hadafyo xoogan iyo qorsheyaal lagu gaarayo si ay u noqdaan mashaariic guulaysta.**

*Ugu wanaagsan (5 dhibcood), Wanaagsan (4 dhibcood), Ku filan (3 dhibcood), Wax la iska weydiin karo (2 dhibcood), U baahan horumarin (1 dhibic)*

- Waa kuwama, yay noqon doonaan, hogaamiyaasha mashruuca iyo farshaxamaystaha? Sidee ayaa lagu doortay, ama lagu dooran doonaa?
- Waa maxay taariikhda ama waaya-aragnimada kooxdaadu, la taliyaashaadu, iyo hogaamiyeyaasha mashruucu kusoo kordhinayaan mashruucaan si loo hubiyo tayada?
- Waa maxay yoolalka mashruucaagu? Waa maxay natiijada aad qorshaynayso inaad gaarto? Waa maxay hababka aad u adeegsan doonto qiimaynta guusha mashruucaaga? Sidee ku ogaanaysaa markaad dhamaystirtay? Sidee ku ogaanaysaa in mashruucu guulaystay?

**Awoodda (5 dhibcood) – Codsiyada ugu wanaagsan waxay faahfaahin ka bixinayaan mashaariicda sida cad u qeexaya qorsheyaal suurtagal ah oo ay ku jiraan cayimista wakhtiga, shaqaalaha, macluumaadka iyo taageerada dhaqaalaha muujinaya in mashruuca loo fulin doono si guul ah.**

*Ugu wanaagsan (5 dhibcood), Wanaagsan (4 dhibcood), Ku filan (3 dhibcood), Wax la iska weydiin karo (2 dhibcood), U baahan horumarin (1 dhibic)*

- Qeex hanaanka qorshaynta ee mashruucaaga.
- Qaabkee guddigaaga agaasinku ama guddiga la taliyeyaashu uga qayb qaadan doonaan?
- Waa maxay filashooyinka ururkaagu leeyahay ee muujinaya awoodda inaad mashruucaan si guul ah u dhamaystirayso?
- Waa maxay wakhtiga u cayiman mashruucaaga?

- Waa maxay taageerada kale ee dhaqaale ee aad ka filayso mashruucaan?

**Kala duwanaanshaha (5 dhibcood) – Codsiyada ugu wanaagsan waxay faahfahinayaan mashruuc noqonaya mid loo simanyahay ayna u dhanyihiin dadka loo danleeyahay wuxuuna ka qaybqaadanayaa adeegyada kala duwnaanshaha dhaqamada iyo farshaxanka ee Saint Paul.**

*Ugu wanaagsan (5 dhibcood), Wanaagsan (4 dhibcood), Ku filan (3 dhibcood), Wax la iska weydiin karo (2 dhibcood), U baahan horumarin (1 dhibic)*

- Sidee mashruucani wax ugu biirinayaa awoodaada kala duwanaanshaha adeegyada dhaqamada ee Saint Paul?
- Adoo tixgalinaya kala duwanaanshaha heerka ugu sareeya (sida, aagga deegaanka, da'da, jinsiga, xaalada dhaqan-dhaqaale, qolada, isirka, rabitaanka nooca galmada, iwm.) faahfaahi sida mashruucani u horseedayo awooda sare oo aad ku dhisi karto iskuguna dhafi karto dadka aad u danleedahay.
- Adigoo tixgalinaya yoolalka mashruucaaga, faahfaahi sida iskudhafnaantu uga dhex muuqato mashruucaaga (sida, gudigaaga agaasinka dhexdiisa ama gudigaaga la talinta, shaqaalaha mashruuca iyo/ama farshamiistayaasha).

## Hanaanka Dib u eegista

### Guddiga Cultural STAR

Sagaalka xubnood ee **Guddiga Saint Paul Cultural STAR** ayaa ah cidda rasmiga ah ee dib eegista ku samaynaysa ee deeqaha u gudbinaysa Duqa magaalada kuwaasoo ka imaanaya qaybta dhaqanka ee maalgalinta canshuurta iibka. Duqa magaaldu wuxuu intaas kaddib tallooyinka u gudbinayaa Golaha Deegaanka si ay u ansixiyaan. Guddigu wuxuu ka kooban yahay sagaal xubnood oouu magacaabay Duqa magaaladu, ayna ansixiyeen Golaha Deegaanku.

### Hanaanka Dib u eegista

Hanaanka xulashada soojeedintu waa mid tartan adag uu kajiro. Tirada iyo cadadka deeqaha la gaarayo waxay ku xiranyihiin tayada codsiga iyo maalgalinta loo hayo. Hanaanka dib u eegistu waa sida soo socota:

- Shaqaalaha Magaaladu waxay dib u eegis ku smaayn doonaan u qalmitaanka. Codsiyada aan u qlamin waxaa laga saari doonaa tixgalinta qofka codsiga lehna waa la ogaysiinayaa.
- Guddigu wuxuu codsade walba oo u qalma ku casuumi doona wareysiga. Codsadeyaasha waxaa lagu wargalin doonaa iimaylka xiliga iyo goobta wareysigu ka dhacayo.
    - Wareysiyada Cultural STAR waa kulamo dadweyne, laakiin majirto markhaati fur dadweyne oo la smaaynayo. Dadka doonaya inay ka hadlaan codsiyada waxaa lagu dhiirigalinayaa inay aragtidooda si qoraal ah ugu soo gudbiyaan shaqaalaha Magaalada kahor intaan wakhtiga codsigu

    dhamaan.
    - Wareysiyadu ma ahan waajib, laakiin inaad waraysigaaga soo xaadirto waxay saamaynaysaa dhibcahaaga guud.
- Guddigu wuxuu dib u eegis ku samayn doonaa codsiyada asagoo ku salaynaya tilmaamaha banaamijka, habraaca qiimeynta kor ku faahfaahsan, iyo helitaanka deeqda iyo in talooyinka maalgalinta loo gudbiyo Duqa magaalada iyo Golaha Deegaanka.
- Duqa magaaladu wuxuu Golaha Deegaanka usoo gudbin doonaa soojeedinada kama danbaysta ah.
- Golaha Deegaanku wuxuu meelmarin doonaa, diidi doonaa, ama wax ka badali doonaa talooyinka Duqa magaalada.
- Duqa magaaladu wuxuu saxiixi doonaa Qaraarka Golaha.

Hanaanka oo dhan wuxuu sida caadiga ah qaataa qiyaastii saddex bilood laga bilaabo markay dhamaato codsashadu ilaa laga gaarayo saxiixa qaraarka ee Duqa magaalada laakiin ka badan ayay qaadan kartaa.

## Waxyaabha Laga filayo Qofka deeqda helaya

### Diyaarinta iyo Fulinta Mashruuca

- Dadka ka faa'iidaysanaya deeqdu waa inay u hogaansamaan shuruucda xaquuqda bulshada ee heer gobol, heer federaal, heer magaalo iyo heer ismaamul ayna hubiyaan inuusan takoor ka dhex dhicin barnaamijyada iyo adeegyada hela maalgalinta Magaalada.
- Kaddib markii Golaha Deegaanku ansixiyo talooyinka Duqa magaalada, shaqaaluhu wuxuu ku wargalin doonaa qof walba oo soo codsaday Cultural STAR in mashruuciisii malagalin la siiyay iyo in kale, iyo haddii la siiyay, cadadka ay tahay. Waxay sidoo kale dadka la abaalmariyay ku wargalin doonaan kulanka kala warqaadashada ah iyo macluumaadka kale ee qandaraaska khuseeya.
- Kahor intaan la fulin mashruuca codsadaha, Dowladda hoose ee Saint Paul ayaa qandaraaska galaya. Qandaraasyada waa in si buuxda loogu fuliyaa lix bilood gudahood marka Golaha Deegaanku ansixiyo. Haddii arintaas lagu guuldaraysto waxaa ka dhalanaysa in la baabi'iyo abaalmarinta. Qandaraaska waxaa kamid noqonaya, ugu yaraan, baaxada adeegyada ay qabanayaan dhinacyada oo dhan, qayb miisaaniyadeed oo faahfaahinaysa dhamaanba ilaha ay ka imaanayaan maalgalinada iyo sida loo isticmaalayo, wakhtiga la fulinayo, iyo shuruudaha iswaafajinta oo ku cad Warbixinta Shaqada. Qandaraaska waxaa loo saxiixi doonaa si waafaqsan siyaasadda Magaalada. Shuruudaha qandaraaska waxaa kamid ah, walow aysan ku ekayn:
    - Qaadashada mas'uuliyadda guud ee caymiska ee caymiska dheeraadka ah u ah Magaalada Saint Paul, taasoo u baahan $1 milyan halkii dhacdaba iyo $2 milyan cabirada guud ee isugaynta ah. Waa muhiim inaad hubiso in caymiskaagu daboolayo dhamaanba wakhtiyada kujira howsha

mashruucaaga.
    - Hubinta Magdhowga Shaqaalaha iyo caymiska Mas'uuliyadda Shaqaalaha, ama foom muujinaya sababta ururka looga reebay.
        - U hogaansanaanta, meelaha ay la xariiraan, **xeerarka federaalka, gobalka iyo kuwa deegaanka** **iyo siyaasadaha loo adeegsado isticmaalka maalgelinta, sida** **heerarka mushaarka ee jira, ficil dhab ah, iyo** **barnaamijyada iibiyaasha ee awooda la saaro**. Cadadka abaalmarinta iyo nooca mashruucu (magaalada, mashruuc gaar ah, ama horumaribta urur) ayaa go'aaminaya shuruucda qabanaysa. Shaqaalaha waxaa loo qaban doonaa kulan ku saabsan u hogaansamidda kahor intaan la meelmarin qandaraaska si loo ogaado shuruucda qabanaysa.

**Codsadeyaasha Cultural STAR waxaa si xoogan looga digayaa inaysan howlgalin ilaa shuruudaha u hogaansamidda iyo shuruucda maalgalinta ay si buuxda ugu fahmayaan.**

- Meelmarinta waa inay ku socotaa sida ku cad codsiga. Haddii aan horusocod jirin waxa aka dhalanaysa in maalgalinta lala noqdo.
- Mashaariicdu waa in lagu dhamaystiraa ama ay iskufilnaansho ku gaaraan muddada ku cad heshiiska. Codsiyada kordhinta muddada qandaraaska lama soo dhaweynaayo.
- Markii la meelmariyo heshiiska deeqda ee qeexaya miisaaniyadda mashruuca ee kama danbaysta ah iyo baaxada shaqada, 80% maalgalinta deeqda ayaa la bixin doonaa.
- Lacag bixinta ugu danbaysa ee baaqiga 20% ee haray waxaa la bixin doonaa kaliya markii la dhamaystiro sidoo kalena warbixinta kama danbaysta ah ee mashruuca taasoo ay la socdaan dukumiintiyada soo socda lasoo gudbiyo lana ansixiyo:
    - Warbixinta faahfaahinta ah ee ugu danbaysa
    - Dukumiintiyada kharashaadka lagu dalacayo deeqda Cultural STAR
    - Dukumiintiyada maalgalinta iswaafajinta, sida khusaysa
    - Dukumiintiyada mashruuca socday, oo ay kujiraan cadaynta aqoonsiga saxda ah ee la siiyay caawimaadda barnaamijka Cultural Support
- Marka la dhamaystiro dhamaanba hawlaha kujira heshiiska, ama marka uu dhamaado wakhtiga heshiisku, baaqiga maalgalinta ee mashruuca kasoo hara waxaa loo soo celinayaa Maalgalinta Cultural STAR.
- Warbixinta kama dambaysta ah ee mashruuca ayaa loo baahanyahay si go'aan looga gaaro ilaa iyo inta ay le egtahay guusha mashruucu. Guusha mashruuca waxaa lagu cabirayaa ayadoo lala barbardhigayo natiijada mashruuca laga filayay

iyo ujeedooyinka guud ee Barnaamijka STAR. Ururadu umaqalmayaan maalgalinada mustaqbalka ee Cultural STAR ilaa dukumiintiyada laga rabo, oo ay kujiraan warbixintaan kama danbaysta ah ee mashruuca, laga soo gudbiyo mashaariicdii ugu danbaysay ee soo dhamaatay.

### Hanaanka Codsiga

Codsiga waa in lagu soo gudbiyo webseedka codsiyada ee onleenka ah Zoomgrants ugu danbayn 4:00 galabnimo taariikhda kamadanabaysta ah. Codsiyada aan xiligaan nasoo gaarin lama aqbali doono.

- Hubi inaad akhriso qayb walba oo codsiga Zoomgrants kamid ah, oo ay kujiraan tilmaamaha, shuruudaha, iwm.
- Codsigaaga waa inaad kusoo dartaa dhamaanba waxyaabaha lagaa doonayo. Waa inaad su'aalaha oo dhan ka jawaabtaa. Waxyaabaha aan dhamaystirnayn ama aan saxda ahayn waxaa ka dhalanaysa in codsigaagu noqdo mid aan u qalmin deeqda.

Kulan kala warqaadasho ah ayaa la qaban doonaa billoowga mar walba oo ay bilaabanayso maalgalinta sannadlaha ah si loo siiyo macluumaadka barnaamijka dadka soo codsanaya. Ka eeg webseedka xiliyada iyo goobaha: **[www.stpaul.gov/culturalSTAR](http://www.stpaul.gov/culturalSTAR)**

Shaqaalaha magaaladu waxay siin karaan kaalmo farsamo dadka soo codsanaya si ay uga caawiyo hubinta in coodsigu noqdo mid dhmaystiran oo awood leh, haddii aad soo codsato marka aad codsiga soo gudbiso, majiri doonaan wax ka badal ama dib u sixid lagu samaynayo oo la aqbalayo.

## Shuruudaha Lahaanshaha Maaliyadda

Barnaamijka Cultural STAR wuxuu aqbalayaa codsiyada ka imaanaya kooxaha aan rasmiga ahayn iyo/ama aan diiwaangashanayn ee farshaxanka inay isticmaalaan maalgaliyaha maaliyadda. Maalgaliyaha Maaliyadda – Waa urur aan faa'iido doon ahayn, canshuurta laga dhaafay kaasoo hela deeqda Cultural STAR sidoo kalena maamula arrimaha dhaqaalaha ee mashruuca asagoo wakiil ka ah koox aan haysan canshuur-dhaaf. Kooxaha ama farshaxamaysteyaasha degen degmada ee u diiwaangashan inay yihiin kuwo khayri ah (LLC, etc) WAA inay si toos ah u codsadaan barnaamijka Cultural STAR, ayagoon lahayn damaanadqaade maaliyadeed.

Tilmaamaha Lahaanshaha Maaliyadda:

- 100% mashruuca codsaduhu waa inuu ka dhacaa gudaha Cultural District.
- Maalgaliyaha maaliyaddu waa inuu yahay urur farshaxan oo aan faa'iido doon ahayn oo kujira 501c3 kuna yaala Saint Paul.
- Codsaduhu waa inuu lahaadaa guddi agaasin ama guddi la talin (lama rabo guddiga damaanadqaadaha maaliyada) kaasoo wax ku biirinaya, korjoogtaynaya, mashruuca.
- Codsaduhu waa inuu keenaa waraaqda heshiiska ee damaanadqaadaha maaliyadda taasoo khusaysa codsiga barnaamijka STAR. Waraaqda waa inay ku

qorantahay cadadka ama boqoleyda damaanadda maaliyadeed (haddii ay jirto).

- Codsaduhu waa inuu kusoo daraa kharashka damaanad qaadaha maaliyada (hadii ay jirto) taasoo qayb ka ah miisaaniyada mashruuciisa.

501c3 waxay damaanad qaadaha maaliyada u nooqn kartaa mashaariic badan oo wareeg kasta oo STAR ah; guddiga ayaa ka fakari doona mashruuca, ururka ama kooxda iyo guddigiisa la talinta asagoo u eegaya shuruudo lamid ah kuwa dhamaanba codsadeyaasha kale ee STAR.

## Erey-bixinada

**Mashruuc So dhamaaday –** Waa mashruuc ay STAR maalgaliso kaasoo dhacay, ayadoo dhamaanba warbixinadii iyo dukumiintiyadii lasoo gudbiyay lana aqbalay, sidoo kalena dhamaanba maalgalintii deeqda ahayd ee uu u qalmay la siiyay qofka deeqda qaadanayay

**Cultural District –** Waa aagga Magaalada Saint Paul ay bartamaha magaalada Magaalada Sainta Paul ku qeexday kaasoo barnaamijka Cultural STAR bartilmaameedsanayo inuu u baahanyahay 80% maalgalinta aagaas

**Maalgaliyaha Maaliyadda** - Waa urur aan faa'iido doon ahayn, canshuurta laga dhaafay kaasoo hela deeqda Cultural STAR sidoo kalena maamula arrimaha dhaqaalaha ee mashruuca asagoo wakiil ka ah koox aan haysan canshuur-dhaaf

**Taariikhda Mahruucu bilaabanayo**- Waa taariikhda shaqada mashruucu bilaabanayso, iyo taariikhda ama ka danbaysa la ogolaaday in kharashaadka la galay lagu soo dalaco deeqda Cultural STAR

**Taariikhda Mashruucu Dhamaanayo –** Waa taariikhda mashruuca la dhamaystiray wax danbe oo kharash ah oo lagu dalacayo Cultural Star aan la galin

**Warbixinta Shaqada –** Waa foom uu buuxiyay qofka deeqda qaadanaya ayna dib u eegis ku sameeyeen oo ay ogolaadeen shaqaalaha Magaaladu kaasoo ku lifaaqan heshiiska deeqda kaasoona faahfaahinaya baaxadda shaqada mashruuca ee la meelmariyay, wakhtiga loo cayimay, goobta iyo miisaaniyadda